Ka caawi Ilmaha Inay Saaxiibo Yeeshaan ayna Si amaan ah Isdhexgal ugu Sameeyaan Oonleenka

Ila marka ay carruurtu bilaabaan wax akhrinta iyo wax qorista, waxay badanaa bilaabaan inay ilmaha kale kala hadlaan oonleenka. Hadday ku sheekaysanayaan ciyaar oonleen ah ama ay fariimo u dirayaan xubnaha qoyska, carruurta ayaa u baahan xirfadaha si ay qaab xushmad leh iskula hadlaan. Xirfadahaan ayaa caawinaaya carruurta -- iyo dadka ay la hadlayaan -- ayna khibrado wanaagsan ka helaan oonleenka.

Akhri 4 taan tilmaamood

Sii erayada saxda ah.

Carruurta ayaa wax ka barta hadalka iyo ficilka wanaagsan ee ay kugu arkaan. Laakiin wada sheekaysiyada oonleenka ayaa noqon kara wax aadan u jeedin. Mararka qaar, sheeko u sheeg markaad qorayso fariimaha ama aad faalooyin ka bixinayso baraha bulshada marka carruurtaadu ay wax dhagaysanayaan.

Ciyaar gaymka taleefanka.

Ka hadal sida fariin isku badali karto ayadoo ku xiran qofka fariinta bixinaaya ama qaabka uu u bixinaayo. Akhri su'aal sida "Maxaad samaynaysaa?" adoo adeegsanaaya codad kaladuwan. Ka hadal sida sawirada astaamaha iyo shaqalladu gacan uga gaysan karaan codka hadalka iyo dareenka ku jira fariin qoraalka.

Ka caawi ilmaha inay bartaan saaxiibada oonleenka.

Biloowga, waxaad yarayn kartaa dhammaan hadalka ay la yeeshaan dadka aysan aqoon ee oonleenka. Marka carruurtu waynaadaan, waxaad la scon kartaa wada sheekaysi kasta oo ay oonleenka ku sameeyaan. Marka ay madax banaani dheeri ah helaana, waxaad kala hadli kartaa qaababka kaladuwan ee wada sheekaysiga ee haboon iyo sidoo kale noocyada xogta ee ay ka qarsanayaan saaxiibada oonleenka ah.

Kobci garaadkooda.

Ka caawi ilmaha inay aaminaan dareenkoda si ay iskaga dhaafaan wada sheekaysiyada xun ama khaldan ee oonleenka ah. Ka hadla qaybaha kaladuwan iyo sida ay dareemayaan iyo waxa ay samayn karaan.

Shareable with attribution for noncommercial use only. No remixing permitted.